DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYAD SANNADEEDKA BISHA JUUN 2025

August 2025

WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYADDA

Bisha Juun 2025

WAXAA SOO SAARAY WARBIXINTAAN

XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA

WAXAAD KA HELI KARTAAN WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: reporting@oags.gov.so

TUSMADA WARBIXINTA

HORDHAC 1

DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025..... 2

DAKHLIGA DAWLADDA BISHA JUUN 2025 & 2024 3

DAKHLIGA CANSHUURAHA 5
DAKHLIYADA KALE 7

DEEQAHA DIBADDA 8

Dhabta Kharashaadka Jan-Jun iyo Miisaaniyadda Sannadka 2025..... 10

DHABTA KHARASHAADKA JANAAYO ILAA JUUN, HAY'ADAHA DAWLADDA 15

KHARASHAADKA JOOGTADA AH 15

KHARASHAADKA MASHAARIICDA..... 16

Lifaaqa 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah, Jan-Juun 2025 17

Lifaaqa 2aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Jan-Juun, 2025 38

Liisk Jaantusyada

Jaantuska 1aad: Dakhliga Dawladda – Bisha Juun 2025 & 2024 4
Jaantuska 2aad: Isbarbardhig Dhakhliga Gudaha – bilaha Jan-Juun 2025 & 2024 4
Jaantuska 3aad: Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Juun 2025 5
Jaantuska 4aad: Dakhliga Canshuuraha Jan-Juun 2025 & 2024 7
Jaantuska 5aad: Isbarbardhig Deeqaha Dibadda Jan-Juun - 2025 & 2024 9
Jaantuska 6aad: Kharashaadka Joogtada ah, Bilaha Jan-Jun - 2025 & 2024 11
Jaantuska 7aad: Kharashaadka Mashaariicda, Bilaha Jan-Juun - 2025 & 2024 12

Liiska shaxaha

Shaxda 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan - Juun 2025 2
Shaxda 2aad: Dhabta Dakhliga Juun 2025 & 2024 3
Shaxda 3aad: Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-Jun ee Sannadaha 2025 & 2024 5
Shaxda 4aad: Deeqaha Dibadda Jan-Juun 2025 iyo 2024 8
Shaxda 5aad: Dhabta Jan-Juun 2025 & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda, ... 10
Shaxda 6aad: Kharashaadka la bixiyey Bisha Juun 2025 iyo 2024 12
Shaxda 7aad: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- Juun 2025 & 2024 14
Shaxda 8aad: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda 15

HORDHAC

Warbixinta fulinta miisaaniyadda waa warbixin bille ah, waxayna faahfaahinaysaa fulinta ama dhaqangelinta miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxayna isbarbardhig ku samaynaysaa dakhliga dhabta ah lasoo uruuriyey iyo kharashaadka dawladda ee la bixiyey sannadka gudihiisa iyo miisaaniyad sannadeedka dakhliga iyo kharashaadka dawladda. Waxayna waafaqsan tahay miisaaniyadda sannadka 2025 oo ay ansixiyeen laba aqal ee baarlamaanka.

Kutalagalka hore ee miisaaniyaddad waxaa loola jeedaa miisaaniyadda asalka ah ee ay labada aqalka ee baarlamaanka ansixiyeen oo aan waxba laga badalin, kutalgalka danbe waxaa loola jeedaa miisaaniyadda asalka ah oo loo kala wareejiyey miisaaniyadda hay'adaha qaar ama madaxyada miisaaniyadda ee hay'adaha dhexdooda.

Wadarta Dakhliga Gudaha ee miisaaniyad sannadeedka 2025 ayaa ah **$430M** wuxuuna ka yahay **32%** wadarta miisaaniyadda dakhliga Dawladda, halka wadarta deeqaha dibadda oo isugu jirta kab miisaaniyaddeed iyo mashaariic ee ku jiray miisaaniyadda ay tahay $**902M** oo **68%** ka ah wadarta dakhilga miisaaniyad sannadeedka 2025.

Wadarta Miisaaniyadda asalka ah ee Kharashaadka Joogtada ah ayaa ah **$628M** waxayna ka tahay **46%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud, halka Miisaaniyadda asalka ah kharashaadka mashaariicda ay tahay **$731M** waxayna ka tahay **54%** wadarta miisaaniyadda Kharashaadka Guud ee sannadka 2025.

Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Jan ilaa Juun 2025 ayaa ahaa **$179M** wuxuuna ka yar yahay **1%** Iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan ilaa Juun 2024. Sidoo kale iskubiirinta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 ayaa ahayd **$147M** waxayna ka hoosaysaa **24%** iskubiirinta deeqaha dibadda la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2024.

Wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 ayaa ahayd **$379M** waxayna ka badan tahay **1%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2024.

Warbixintaan ayaa ka koobnaan doonta saddex qaybood. Qaybta koowaad ee warbixinta fulinta miisaaniyadda oo lagu faahfaahin doonaa dhabta dakhliga Dawladda; Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda, iyadoo la isbarbardhigi doono dakhliga dhabta iyo miisaaniyad sannadeedka qaybaha dakhliga Dawladda ka kooban yahay.

Qaybta labaad ee warbixinta waxaa lagu faahfaahin doonaa kharashaadka dawladda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2025, Iyadoo loo fiirinaayo waafaqsanaanta sida lagu ansixiyey miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxaana loo kala qaadi doonaa kharashaadka dawladda labo qaybood; kharashaadka Joogtada ah iyo kharashaadka mashaariicda.

Warbixinta qaybta saddexaad waxaa ku lifaaqan faahfaahinta isticmaalka miisaaniyadda ee hay'adaha dawladda, loona kala qaaday sida ay hay'adaha u fuliyeen kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda ee miisaaniyad sannadeedka 2025. Lifaaqa koowaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa shax faahfaahsan ee isticmaalka hay'adaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, lifaaqa labaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa doonaa shaxda isticmaalka hay'adaha ee kharashaadka miisaaniyadda mashaariicda 2025.

DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025

Miisaaniyadda Asalka ee wadarta dakhaliga ayaa ah **$1,331,969,583** oo la filaayo in ay Dawladda soo uruuriso sannad maaliyadeedka 2025 gudihiisa. Miisaaniyada Dakhliga Gudaha ayaa ah **$430,341,430** oo **32%** ka ah wadarta miisaaniyad sannadeedka, halka deeqaha dibada la filaayo in la soo xareeyo ay tahay **$901,628154** oo **68%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga ee sannadka 2025.

Faah-Faahin	Dhabta Juun 2025	Dhabta Jan-Jun 2025	Kutalagalka Hore	% Fulinta
Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda	**$73,413,317**	**$326,899,124**	**$1,331,969,583**	**25%**
Dakhliga Gudaha	**26,300,604**	**179,460,429**	**430,341,430**	**42%**
Dakhliga Canshuuraha	**18,222,895**	**130,179,046**	**295,289,259**	**44%**
Canshuurta Dakhliga & Faaiidooyinka	2,167,850	24,723,829	38,031,213	65%
Canshuurta Adeegga & Agabka	3,271,280	26,485,996	56,111,497	47%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	11,823,544	74,737,725	186,211,437	40%
Canshuuraha Kale	960,221	4,231,496	14,935,112	28%
Dakhliyada Kale	**8,077,709**	**49,281,383**	**135,052,170**	**36%**
DEEQAHA DIBADDA	**47,112,713**	**147,438,695**	**901,628,154**	**16%**
Deeqaha laba dhinaclaha	920,884	13,061,806	42,000,000	31%
Deeqaha Dhinacyada badan	46,191,829	134,376,889	859,628,154	16%

Shaxda 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan - Juun 2025

Shaxda 1aad waxay soo bandhigaysaa dakhliga dhabta ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun iyo miisaaniyad sannadeedka 2025. Wadarta dakhliga la helay bisha Juun ayaa ah **$73M**, Dakhliga Gudaha waxaa ka soo xarooday **$26M** una dhiganta **36%** wadarta dakhliga la helay bisha Juun, Deeqaha dibaddaa ayaa la helay **$47M** oo u dhiganta **64%** wadarta dakhliga la helay bisha Juun 2025.

Wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa Juun ayaa ah **$327M** oo **25%** ka ah miisaaniyad sannadeedka 2025. Dakhliga Gudaha ayaa lasoo uruuriyey **$179M** oo u dhiganta **42%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Deeqaha Dibadda ayaa la helay **$147M** oo u dhiganta **16%** miisaaniyad sannadeedka 2025 ee wadarta deeqaha dibadda.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa Juun dakhli dhan **$25M** oo u dhiganta **65%** wadarta miisaaniyad sannadeedka canshuurtaan. Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey **$26M** oo ah **47%** miisaaniyadda sannadka, sidoo kale Canshuurta Ganacsiga Dibadda ayaa lasoo uruuriyey **$75M** oo u dhiganta **40%** miisaaniyad sannadeedka 2025.

Deeqaha laba dhinaclaha ah ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa Juun dakhli dhan **$13M** oo **31%** ka ah miisaaniyadda sannadka 2025, Deeqaha dhinacyada badan waxaa la helay **$134M** oo u dhiganta **16%** miisaaniyadda sannadka 2025.

DAKHLIGA DAWLADDA BISHA JUUN 2025 & 2024

Dakhliga Dawladda wuxuu ka soo xaroodaa dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda. Dakhliga Gudaha ayaa loo kala qaadaa dakhliga canshuraha iyo dakhliyada kale. Shaxda 2aad waxay isbarbardhigaysaa dakhliga Dawladdu heshay bisha Juun ee sannadaha 2025 iyo 2024.

Faah-Faahin	Dhabta Juun 2025	Dhabta Juun 2024	Koror/ Naaqus
Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda	**$73,413,317**	**$113,918,429**	**-36%**
Dakhliga Gudaha	**26,300,604**	**30,558,033**	**-14%**
Dakhliga Canshuuraha	**18,222,895**	**21,799,380**	**-16%**
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	2,167,850	2,234,934	-3%
Canshuurta Adeegga & Agabka	3,271,280	4,155,022	-21%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	11,823,544	14,558,288	-19%
Canshuuraha Kale	960,221	851,136	13%
Dakhliyada Kale	**8,077,709**	**8,758,653**	**-8%**
Dakhliga Hantida	28,356	22,166	28%
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	7,976,707	8,714,875	-8%
Ganaaxa, Ciqaabta	72,646	21,612	236%
DEEQAHA DIBADDA	**47,112,713**	**83,360,396**	**-43%**
Deeqaha laba dhinaclaha	920,884	939,741	-2%
Deeqaha Dhinacyada badan	46,191,829	82,420,655	-44%

Shaxda 2aad: Dhabta Dakhliga Juun 2025 & 2024

Sida ka muuqato shaxda 2aad dakhliga Dawladda ayaa hoos u dhacay bisha Juun 2025, wuxuuna ka yar yahay **36%** wadarta dakhliga Dawladda ee la helay bisha Jun 2024. Dakhliga gudaha ayaa hoos u dhacay **14%** bisha Juun 2025, sidoo kalane deeqaha dibadda ay hoos u dhacay **43%** marka la barbardhigo deeqda Dawladdu heshay bisha Juun 2024.

Dakhliga ugu badan ee hoos u dhacay waa Deeqaha dibada **43%** bisha Juun 2025 marka la barbardhigo deeqaha la helay bisha Juun 2024. Dakhliga Canshuuraha ee Bisha Juun 2025 wuxuu hoos u dhacay **16%** marka la barbardhigo dakhliga canshuuraha ee la helay bisha Juun 2024. Dakhliyada kale ayaa hoos u dhacay **8%** marka la barbardhigo dakhliyada kale ee la helay bisha Juun 2024.

Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey bisha Juun 2025 dakhli dhan $**3M** wuxuuna ka hoosaayaa **21%** Canshuurta Agabka iyo Adegga ee la helay bisha Juun 2024. Hoos u dhaca ugu badan ee canshuurtaan ayaa ka yimid Canshuuraha Iibka - Alaabta Kale ee Dibadda Laga Keeno, wuxuuna ka hoosaaya 27% wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bisha Juun 2025.



Jaantuska 1aad: Dakhliga Dawladda – Bisha Juun 2025 & 2024

Sida ka muuqata Jaantuska 1aad Dakhliga Gudaha ee la helay bisha Juun 2025 ayaa ah **$26M** wuxuuna ka hooseeyaa **$4M** dakhliga gudaha la helay bisha Juun 2024. Deeqaha dibada ee la helay bisha Juun 2025 ayaa ah $**47M** wuxuuna ka hooseeyaa $**36M** deeqaha dibadda ee la helay bisha Juun 2024.

Bisha Juun 2025, deeqaha dibadda ayaa laga kala helay, Imaaraadka Carabta oo laga helay dakhli ku dhaw **920K**, Bangiga Adduunka oo laga helay lacag ka badan **45.7M** iyo Bangiga Horumarinta Afrika **506K,** bisha Juun 2025.

DAKHLIGA GUDAHA

Odoroska miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha ayaa ah $**430M**, waxaana la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 dakhli dhan $**179M** oo u dhiganta **42%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun ee sannadka 2025 ayaa **1%** ka yaryahay dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan ilaa Juun ee sannadka 2024.



Jaantuska 2aad: Isbarbardhig Dhakhliga Gudaha – bilaha Jan-Juun 2025 & 2024

Sida ka muuqata jaantusta 2aad, wuxuu muujinayaa isbarbardhiga dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun ee sanadaha 2025 iyo 2024. Bisha April ee sannadka 2025 dakhliga gudaha ayaa Korarka ugu badan sameyay, waxaana la helay $**27M** oo ka badan **14%** dakhliga gudaha ee la helay bisha April 2024.

Bisha Juun 2025 waxaa la soo uruuriyey dakhli dhan $**26M**, wuxuuna ka hooseeyaa **14%** wadarta dakhliga gudaha ee la soo uruuriyey bisha Juun 2024.

Bisha Janaayo ee sannadaha 2024 iyo 2025 waxaa la soo uruuriyey **27M**, mana jirin koror iyo naaqus dakhliga la helay bisha Janaayo ee sanadaha 2025 iyo 2024.



Jaantuska 3aad: Qaybaha Dakhliga Gudaha Jan-Juun 2025

Dakhliga Canshuuraha ee la helay bisha Juun 2025 ayaa hoos u dhacay **16%** marka la barbardhigo dakhliga canshuuraha ee la helay bisha Juun 2024, halka dakhliyada kale ee la helay bisha Juun ee sannadka 2025 uu jiro Hoos u dhac **8%** marka loo fiiriyo dakhliyada kale ee la helay bisha Juun 2024.

Sida ka muuqato jaantuska 3aad, iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun ee sannadka 2025, wuxuu **73%** kasoo xarooday dakhliga cashuuraha, halka **27%** kasoo xarooday dakliyada kale.

DAKHLIGA CANSHUURAHA

Dakhliga Canshuuraha ayaa loo kala qaadaa 4 qaybood oo kale ah; Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Canshuurta Agabka iyo Adeegga, Canshuurta Ganacsiga Dibadda iyo Canshuuraha kale. Canshuurta ugu badan dakhliga gudaha ayaa ah Canshuurta Ganacsiga Dibadda.

Faah-Faahin	Dakhliga Jan-Juun 2025	Dakhliga Jan-Juun 2024	Koror/ Naaqus
Dakhliga Gudaha	**179,460,429**	**181,061,551**	**-1%**
Canshuuraha	**130,179,046**	**128,496,949**	**1%**
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	24,723,829	17,721,470	40%
Canshuurta Agabka & Adeegga	26,485,996	24,024,043	10%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	74,737,725	81,764,496	-9%
Canshuuraha Kale	4,231,496	4,986,941	-15%
Dakhliyada Kale	**49,281,383**	**52,564,602**	**-6%**
Dakhliga Hantida	280,766	342,519	-18%
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	48,509,733	52,097,109	-7%
Ganaaxa, Ciqaabta	490,885	124,974	293%

Shaxda 3aad: Iskubiirinta Dakhliga Gudaha ee Jan-Jun ee Sannadaha 2025 & 2024

CANSHUURTA DAKHLIGA IYO FAA'IIDOOYINKA

Canshuuraha Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, waxayna ka tahay **19%** dhabta Dakhliga Canshuuraha ee la helay bilaha Jan-Jun ee sannadaha 2025. Canshuurtaan ayaa laga qaadaa dakhliga soo gala qofka iyo shirkadaha, waxayna ka kala timaadaa, canshuurta mushaarka shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah, canshuurta dakhliga kirooyinka daaraha iyo canshuurta faa'iidada shirkadaha. Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ayaa korortay **40%** bilaha Jan-Jun sannadka 2025, waxaana la helay dakhli dhan **$25M**, halka bilaha Jan ilaa Juun ee sannadka 2024 la helay **$18M** oo ka hooseeyo canshuurta la helay sannadkaan. Canshuurta Faa'iidada Shirkadaaha ayaa la helay bilaha Jan-Jun 2025 koror dhan **$4M** una dhiganta **64%** wadarta kororka Canshuurta Dakhlig aiyo Faa'iidooyinka ee la helay sannadka 2025. Sidoo kale canshuurta kirada daaraha ayaa la helay koror dhan **$1M** una dhiganta **15%** wadarta kororka la helay ee Canshuurta Dakhlig aiyo Faa'iidooyinka, Canshuruurta Mushaarka shaqaalaha ayaa la helay koror dhan **$1.5M** oo u dhiganta **21%** wadarta kororka Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2025.

CANSHUURTA AGABKA IYO ADEEGA

Waxaa la helay bilaha Jan-Jun dakhli dhan **$26.5M** oo ka badan **10%** iskubiirinta Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2024. Waxayna ka tahay **20%** wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxaa laga qaadaa canshuurtaan ganacsiyada dalka waxaana ka mid ah; canshuurta gedista ee suuqyada, canshuurta wadamarista gawaarida iyo canshuurta gedista ee laga qaado shirkadaha bixiya adeegyada ganacsiga.

Canshuurta gadista ee badeecadaha kasoo daga dekadda iyo canshuurta gadista ee laga qaado suuqyada ayaa laga helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 dakhli dhan **$18.5M** oo u dhiganta **70%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega, Canshuuraha Wado-marista iyo Nootaayooyinka ayaa laga helay **$2M** oo u dhiganta **9%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeegga ee la soo uruuriyey bilaha Jan-Juun 2025.

CANSHUURTA GANACSIGA DIBADDA

Waa canshuurta laga qaado badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaraadaha Muqdishu. Waana dakhliga ugu muhiimsan dakhliga Dawladda kasoo galo gudaha dalka.

Bilaha Jan ilaa Juun ee sannadka 2025 waxaa ka soo xarooday canshuur dhan **$75M** oo u dhiganta **57%** wadarta Dakhliga Canshuuraha, waxayna ka tahay **40%** wadarta miisaaniyad sannadeedka Dakhliga Gudaha.

CANSHUURAHA KALE

Miisaaniyad sannadeedka Canshuuraha kale ayaa ah **$15M**, waxaana ka soo xarooday bilaha Jan-Jun 2025 dhakhli dhan **$4M** oo dhiganta **3%** wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxay ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badqabka gawaarida, farankaboolada qaansheegooyinka ganacsiga ee adeegyada ama badeecadaha kasoo daga furdooyinka.

Iskudarka Canshuuraha kale ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa Juun ee sannadka 2025 ayaa **15%** ayuu hoos u dhacay marka la barbardhigo canshuuraha kale la helay bilaha Jan ilaa Juun ee sannadka 2024.



Jaantuska 4aad: Dakhliga Canshuuraha Jan-Juun 2025 & 2024

Sida ka muuqato jaantuska 4aad oo soo bandhigaayo isbarbardhigaayo qaybaha dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun ee sannadaha 2025 iyo 2024. Wuxuu kaloo muujinyaa kororka iyo naaquska qaybaha dakhliga canshuuraha marka la is barbardhigo qaybaha dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun ee sannadaha 2025 iyo 2024.

DAKHLIYADA KALE

Dakhliyada kale, waa dakhli ka soo xarooda adeegyada maamul oo ay bixiso Dawladda, sida bixinta shaatiyada ganacsiga, adeegyada dekadda iyo garoonka diyaaradaha, bixinta baasaboorada, iyo dalkugalka ajaanibta. Waxaa ka soo xarooday bilaha Jan ilaa Juun 2025 dakhli dhan **$49M** wuxuuna ka hooseeyaa **6%** dakhliyada kale ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2024.

Dakhliyada kale ee lasoo uruuriyey bilaha Jan ilaa Juun 2025, waxaa **$20M** oo dhiganta **41%** wadarta dakhliyada kale kasoo xarooday adeegyada maamul Dawladda ka bixiso Dekadda iyo Groonka diyaaradaha Magaalada Muqdisho. Bixinta Baasaboorada iyo dalkugalka ajaanibta waxaa ka soo xarooday dakhli dhan **$9M** oo u dhiganta **18%** wadarta dakhliyada kale. Diyaaradaha mara hawada soomaaliya waxaa laga helay **$10M** oo u dhiganta **21%** wadarta Dakhliyada Kale ee la helay bilah Janaayo ilaa Juun 2025. Khidmaha Isgaarsiinta ayaa laga helay **$3M** oo u dhiganta **7%** wadarta dakhliyada kale.

Sidoo kale dakhliga laga helay Dakhliga Hantida ee la helay bilaha Jan ilaa Juun ee sannadka 2025 ayaa ka hooseeyaa **18%** dakhligii hantida ee la helay bilaha Jan ilaa Juun ee sannadka 2024. Sida ka muuqato shaxda 3aad, iskudarka dakhliga kasoo xarooday Ganaaxa iyo Ciqaabta ayaa kordhay **293%** bilaha Jan ilaa Juun 2025, waxaana la helay dakhli dhan **$491K** halka bilaha Jan ilaa Juun ee sannadka 2024 la helay dakhli dhan **$125K**.

DEEQAHA DIBADDA

Deeqaha Dibadda oo ka ah **68%** wadarta dakhliga miisaaniyadda Dawladda, waxaa la helay **$147M** oo u dhiganta **16%** miisaaniyad sannadeedka deeqaha dibadda. Wadarta deeqaaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 ayaa hoos u dhacay **24%**, marka loo fiiriyo wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2024. Deeqaha dhinacyada badan ayaa la helay dakhli dhan **$134M** oo **24%** ka yar deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2024. Deeqaha laba dhinaclaha ah ayaa la helay **$13M** oo ka yar **22%** wadarta deeqaha laba dhinacalaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2024.

Faah-Faahin	Dhabta Jan-Juun 2025	Dhabta Jan-Juun 2024	Koror/Naaqus
DEEQAHA DIBADDA	**147,438,695**	**193,055,615**	**-24%**
Deeqaha laba dhinaclaha	**13,061,806**	**16,643,609**	**-22%**
Turkiga	7,500,000	7,500,000	0%
Imaaraadka Carabta	5,561,806	9,143,609	-39%
Deeqaha Dhinacyada badan	**134,376,889**	**176,412,006**	**-24%**
Bangiga Adduunka	129,676,506	170,879,800	-24%
Bangiga Harumarinta Afrika	3,010,576	2,378,545	27%
Qaramada Midoobay	1,295,658	-	0%
Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE)	394,150	3,153,662	-88%

Shaxda 4aad: Deeqaha Dibadda Jan-Juun 2025 iyo 2024

Deeqaha dibadda waxay isugu jirtaa deeq kab miisaaniyadeed oo ay Dawladdu ka hesho hay'ado caalami ah iyo Dawladaha kabo miisaaniyadda Dawladda iyo kab mashaariic oo loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariic laga fuliyo dalka gudahiisa.

Deeqaha labo dhinaclaha ah waxaa la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 deeq dhan **$13M** oo **22%** ka yartahay deeqaha labo dhinaclaha ah ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2024. Dawladda Turkiga ayaa laga helay **$7.5M** oo u dhiganta **57%**, halka Imaaraadka Carabta laga helay **$5.6M** oo u dhiganta **43%** wadarta deeqaaha labo dhinaclaha ah ee la helay bilaha Janaayo ilaa Juun 2025.

Deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Jan ilaa Juun 2025 ayaa ah **$134M**, waxayna **24%** ka hooseeysaa deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Jan ilaa Juun 2024. Deeqaha dhinacyadda ee la helay bilaha Jan ilaa Juun 2025 waxaa **88%** Dawladda ugu deeqay Bangiga Adduunka, halka **12%** Dawladda ugu deeqeen hay'adaha kala duwan sida ka muuqato shaxda 4aad.



Jaantuska 5aad: Isbarbardhig Deeqaha Dibadda Jan-Juun - 2025 & 2024

Sida ka muuqato jaantuska 5aad, Deeqaha dibadda ee la helay bilaha Jan-Mar ee sannadka 2025 ayaa ka badan deeqaha dibadda ee la helay bilaha Jan-Mar 2024. Bisha Mar 2025 ayaa la helay deeq dhan **34M** waxayna ka badan tahay **110%** deeqdii la helay bisha Mar 2024.

Bilaha April iyo May 2025 ayaa la helay deeq ka hooseeysaa deeqdii la helay bilaha April iyo May 2024. Bisha April 2025 ayaa la helay **4M** waxayna ka hoseeysaa **90%** deeqdii la helay bisha April 2024. Sido kale bisha May 2025 ayaa la helay deeq dhan **31M** waxayna ka hooseeysaa **28%** wadarta deeqaha dibadda ee la helay bisha May 2024.

Bisha Juun 2025 ayaa la helay deeq dhan **47M** waxayna ka hoseysaa **43%** wadarta deeqaha dibadda ee la helay bisha Juun 2024.

Dhabta Kharashaadka Jan-Jun iyo Miisaaniyadda Sannadka 2025

Faah-Faahin	Dhabta Juun 2025	Dhabta Jan-Juun 2025	Kutalagalka Dambe	Kutalagalka Hore	% Fulinta
KHARASHKA GUUD	**87,346,867**	**379,171,360**	**1,359,714,328**	**1,359,714,328**	**28%**
Kharashaadka Joogtada	**39,561,554**	**259,624,614**	**631,414,868**	**628,053,674**	**41%**
Mushaarka Shaqaalaha	26,220,158	173,691,269	365,814,085	365,755,765	47%
Isticmaalka Agabka & Adeega	8,778,614	50,728,510	138,170,686	139,587,608	37%
Dulsaarka	67,702	2,915,443	13,800,000	13,800,000	21%
Kaalmo Dhaqaale	-	-	-	-	0%
Deeqaha	4,197,298	21,973,385	89,605,486	91,641,266	25%
Faa'idada Bulshada	-	-	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	297,783	10,316,007	24,024,610	17,269,034	43%
Kharashaadka Mashaariicda	**47,785,313**	**119,546,746**	**728,299,460**	**731,660,654**	**16%**
Mushaarka Shaqaalaha	384,169	1,798,538	4,820,840	4,244,860	37%
Isticmaalka Agabka & Adeega	7,665,612	36,998,908	259,631,337	256,865,498	14%
Kaalmo Dhaqaale	824,618	997,129	13,470,000	13,280,000	7%
Deeqaha	14,277,871	32,805,518	141,576,680	147,022,709	23%
Faa'idada Bulshada	-	-	76,824,000	77,000,000	0%
Kharashaadka Kale	17,536,397	29,265,103	64,427,668	68,416,928	45%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	7,096,646	17,681,550	167,548,934	164,830,659	11%

Shaxda 5aad: Dhabta Jan-Juun 2025 & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda,

Kharashaadka Dawladda waxaa loo kala qaadaa, kharashaadka joogtada ah iyo Mashaariicda. Kharashaadka joogtada ah waa kharashaadka Dawladda ee laga maalgaliyo Dakhliga Gudaha iyo kabka miisaaniyadadeed oo ay Dawladdu ka hesho deeqaha dibabadda. Waxaa laga bixiyaa kharashaadka socodsiinta howlaha Dawladdu, sida mushaaraadka shaqaalaha Dawladda, isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee hay'adaha Dawladda. Kharashaadka Mashaariicda waxaa laga maaligaliyaa kab mashaariicda ee Dawladda ka hesho deeqaha dibadda.

Kharashka Bisha Juun 2025

Sida ka muuqato shaxda 5aad waxaa la bixiyey bisha Juun 2025 kharash dhan **$87M,** kharashaadka joogtada ah waxaa laga bixiyey **$40M** oo u dhiganta **45%** wadarta kharashaadka guud, halka kharashaadka mashaariicdana laga bixiyey **$48M** oo u dhiganta **55%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Juun 2025.

Mushaarka shaqaalaha ayaa ugu badan kharashaadka la bixiyey bisha Juun waxaana la bixiyey **$26M** oo u dhiganta **66%** wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo adeegga ayaa la bixiyey **$9M** oo u dhigtanta **22%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Juun 2025. Deeqaha la siiyo dawlad gobleedyada ayaa lagu bixiyey $**4M** oo 11% ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Juun 2025.

Kharashaadka mashaariicda ayaa bixiyey bisha Juun 2025 kharash dhan **$48M**, kharashaadka agabka iyo adeegga ayaa lagu bixiyey **$8M** oo u dhiganta **16%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Juun 2025. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey **$14M** oo u dhiganta **30%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Juun 2025.

Kharashaadka Jan-Juun 2025

Iskudarka kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 ayaa ahayd **$379M** oo u dhiganta **28%** miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2025. Kharashaadka Joogtada ah ayaa la bixiyey **$260M** oo u dhiganta **41%** miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, halka mashaariicda laga bixiyey **$120M** oo u dhiganta **16%** miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ee sannadka 2025.

Kharashaadka Jogtada ah

Mushaaraadka shaqaalaha Dawladda ayaa la bixiyey **$174M** oo u dhiganta **47%** miisaaniyadda Mushaarka shaqaalaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, wuxuuna ka yahay **67%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiyey **$51M** oo u dhiganta **37%** miisaaniyadda Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah. Wuxuuna **20%** ka yahay wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka soo iibsashadda hantida aan maaliyadda ahayn ayaa la bixiyey **$10M** oo u dhiganta **43%** misaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, waxayna ka tahay **4%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Jan ilaa Juun 2025.



Jaantuska 6aad: Kharashaadka Joogtada ah, Bilaha Jan-Jun - 2025 & 2024

Sida ka muuqato jaantuska 6aad oo soo bandhigaya isbarbardhigaya kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Jan ilaa Juun ee sannadaha 2025 & 2024.

Bisha Febraayo ee sannadka 2025 waxaa la bixiyey **$55M** oo ka badan **40%** kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Febraayo 2024. Sidoo kale bisha Maarso 2025 waxaa la bixiyey **$58M** oo ka badan **28%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Maarso 2024. Bisha May 2025 waxaa la bixiyey **$49M** oo ka badan **3%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha May 2024, Bisha Juun 2025 waxaa la bixiyey **$39M** oo ka badan **10%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Juun 2024, halka bisha Janaayo ee sannadka 2025 la bixiyey kharash ka hooseeyo **4%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Janaayo 2024.

Kharashaadka Mashaariicda

Iskudarka Kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bilaha Jan ilaa Juun ayaa aheyd **$120M** oo u dhiganta **16%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka mashaariicda. Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ayaa la bixiye **$37M** oo u dhiganta **14%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **31%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan ilaa Juun 2025.

Deeqaha la siiyo Dawlad goboleedyada ayaa la bixiyey **$33M** oo u dhiganta **23%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **28%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan ilaa Juun 2025.



Jaantuska 7aad: Kharashaadka Mashaariicda, Bilaha Jan-Juun - 2025 & 2024

Sida ka muuqato jaantuska 7aad, wuxuu isbarbardhig ku samaynayaa kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun ee sannadaha 2025 & 2024.

Bisha Juun 2024 ayaa la bixiyey kharashka ugu badan, waxaana la bixiyey **$78M** oo ka hooseeyso **38%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Juun 2025. Bisha April 2025 waxaa la bixiyey kharash dhan **$4M** oo ka hooseeyso **90%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha April 2024. Sida ka muuqato jaantuska bilaha Janaayo iyo Febraayo ee sannadka 2025 waxaa la bixiyey kharash ka badan wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2024.

Isbarbardhiga Kharash Bixinta Bisha Juun ee 2025 & 2024

Faahfaahin	Dhabta Juun 2025	Dhabta Juun 2024	Koror/Naaqus
Wadarta Kharashaadka Guud	**87,346,867**	**113,620,987**	**-23%**
Kharashaadka Joogtada	**39,561,554**	**36,082,500**	**10%**
Mushaarka Shaqaalaha	26,220,158	23,888,200	10%
Isticmaalka Agabka & Adeega	8,778,614	8,311,669	6%
Dulsaarka	67,702	926,033	-93%
Kaalmo Dhaqaale	-	-	0%
Deeqaha	4,197,298	2,956,597	42%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	-	-	0%
Dib u bixin Daymaha/Horumaris	297,783	-	0%
Kharashaadka Mashaariicda	**47,785,313**	**77,538,487**	**-38%**
Mushaarka Shaqaalaha	384,169	435,288	-12%
Isticmaalka Agabka & Adeega	7,665,612	8,737,312	-12%
Kaalmo Dhaqaale	824,618	576,350	43%
Deeqaha	14,277,871	10,758,520	33%
Faa'iidada Bulshada	-	55,812,053	-100%
Other Expenses	17,536,397	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	7,096,646	1,218,965	482%

Shaxda 6aad: Kharashaadka la bixiyey Bisha Juun 2025 iyo 2024

Sida ka muuqato shaxda 6aad oo isbarbardhigaysaa kharashaadkii la bixiyey bisha Juun ee sannadaha 2025 iyo 2024. Wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey ayaa hoos u dhacay **23%**

bisha Juun 2025 marka loo barbardhigo wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha Juun ee sannadka 2024.

Wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey bisha Juun 2025 ayaa korortay **10%** marka loo fiiriyo wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Juun ee sannadka 2024. Kharashaadka mashariicda ayaa la bixiyey **$48M** waxayna **38%** hoos u dhacday wadarta kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bisha Juun 2024.

Kharashaadka joogtada ee Mushaarka Shaqaalaha ee la bixiyey bisha Juun 2025 ayaa ahaa **$26M** oo **10%** oo kabadan kharashaadka joogtada ee mushaarka shaqalaha ee la bixiyey bisha Juun 2024.

Kharashaadka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bisha Juun 2025 ayaa ahaa **$9M** oo **6%** kabadan kharashaadka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey bish Juun 2024.

Dhammaan kharashaadka kale ayaa hoos u dhacay bisha Juun 2025, marka labarbardhigo kharashaadkii la bixiyey bisha Juun 2024.

Isbarbardhiga Kharash Bixinta Bilaha Jan-Jun ee 2025 & 2024

Faahfaahin	Dhabta Jan-Juun 2025	Dhabta Jan-Juun 2024	Koror/Naaqus
Wadarta Kharashaadka Guud	**379,171,360**	**375,454,473**	**1%**
Kharashaadka Joogtada	**259,624,614**	**227,592,578**	**14%**
Mushaarka Shaqaalaha	173,691,269	161,402,734	8%
Isticmaalka Agabka & Adeega	50,728,510	43,788,097	16%
Dulsaarka	2,915,443	1,846,577	58%
Kabka	-	-	0%
Deeqaha	21,973,385	20,193,421	9%
Faa'idada Bulshada	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	10,316,007	361,750	2752%
Dib u bixin Daymaha/Horumaris	-	-	0%
Kharashaadka Mashaariicda	**119,546,746**	**147,861,895**	**-19%**
Mushaarka Shaqaalaha	1,798,538	1,384,367	30%
Isticmaalka Agabka & Adeega	36,998,908	28,352,634	30%
Kabka	997,129	3,172,753	-69%
Deeqaha	32,805,518	29,284,745	12%
Faa'idada Bulshada	-	82,552,053	-100%
Other expenses	29,265,103	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	17,681,550	3,115,343	468%

Shaxda 7aad: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- Juun 2025 & 2024

Iskudarka kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 ayaa kordhay **1%**, marka la barbardhigo kharshaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo Juun 2024. Kharashaadka joogtada ah ayaa kordhay **14%,** halka kharashaadka mashaariicda ay hoos u dhaceen **19%** marka la barbardhigo iskudarka kharashaadkii la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2024.

Kharashaadka joogtada ah, Mushaaraadka shaqaalaha ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 ayaa kordhay **8%** marka loo barbardhigo Mushaaraadka Shaqaalaha ee la bixyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2024. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa kordhay **16%** bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 marka la barbardhigo kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2024. Sidoo kale soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ayaa aad u korortay bilaha Janaayo ilaa Juun 2025.

Kharashaadka laga bixiyey mashaariicda, waxaa kororka ugu badan sameeyey soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn oo korortay **468%** marka loo barbardhigo kharashaadkkii soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2024. Sido kale waxaa kaloo kordhay **30%** Isticmaalka Agab iyo Adeegg oo laga bixiyey kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 marka la barbardhigo Agab iyo Adeegga la bixiyey bilaha Jan ilaa Juun 2024.

DHABTA KHARASHAADKA JANAAYO ILAA JUUN, HAY'ADAHA DAWLADDA

Shaxda 8aad waxaa ka muuqdo dhabta kharashadka guud ee Dawladda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2025, iyadoo loo fiirinaayo sida ay u isticmaaleen qaybaha shaqo ee loo kala qaybiyo hay'adaha Dawladda. Sidoo kale kharashaadka waxaa loo kala qaaday kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Bilaha Janaayo ilaa Juun 2025, waxaa la bixiyey kharash dhan **$379M** oo u dhiganta **28%** wadarta miisaaniyad sanadeedka kharashaadka Guud ee Dawladda.

Faah-faahinta	Dhabta Juun 2025	Dhabta Jan-Juun 2025	Kutalagalka Dambe	Kutalagalka Hore	% Fulinta
KHARASHKA GUUD	**87,346,867**	**379,171,360**	**1,359,714,328**	**1,359,714,328**	**28%**
Kharashaadka Joogtada	**39,561,554**	**259,624,614**	**631,414,868**	**628,053,674**	**41%**
Hay'adaha Adeeg Maamulka	14,951,211	101,044,538	277,207,900	273,973,094	36%
Hay'adaha Adeeg Amniga	21,141,912	123,071,104	257,176,428	257,147,965	48%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	2,023,334	16,387,316	45,192,107	45,127,551	36%
Hay'adaha Adeeg Bulshada	1,445,096	19,121,656	51,838,432	51,805,063	37%
Kharashaadka Mashaariicda	**47,785,313**	**119,546,746**	**728,299,460**	**731,660,654**	**16%**
Hay'adaha Adeeg Maamulka	13,169,485	40,215,693	161,273,157	164,634,351	25%
Hay'adaha Adeeg Amniga	-	-	-	-	0%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	14,130,758	38,196,110	289,506,013	289,506,013	13%
Hay'daha Adeeg Bulshada	20,485,071	41,134,942	277,520,289	277,520,289	15%

Shaxda 8aad: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda

KHARASHAADKA JOOGTADA AH

Kharashka ugu badan ee la bixiyey waxaa laga bixiyey miisaaniydda kharshaadka joogtada ah, waxaana la bixiyey kharash dhan **$259M** oo u dhiganta **41%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2025. Kharashaadka joogtada ee la bixiye ayaa ahaa **68%** ka ahaa wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Jan ilaa Juun 2025.

Iskudarka bilaha Janaayo ilaa Juun ayaa Hay'adaha Amniga lagu bixiyey **$123M** oo u dhiganta **48%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah. Miisaaniyada Hay'adaha Adeegga Maamulka ayaa lagu bixiyey **$101M** oo u dhiganta **36%** miisaaniyad sannadeedka kharshaadka joogtada ah ee Hay'adaha Adeegga Maamulka. Hay'adaha Dhaqaalaha iyo Bulshada ayaa lagu bixiyey **$16M** oo u dhiganta **36%,** Hay'adaha Bulshada miisaaniyad ayaa lagu bixiyey **$19M** oo u dhiganta **37%** sannadeedka Hay'adaha Bulshada.

Kharashaadka ugu badan ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah ee la bixiye bilaha Janaayo ilaa Juun 2025 waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Amniga, waxaana ku baxday, $123M oo **47%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey bilaha Jan ilaa Juun 2025. Hay'adaha maamulka ayaa lagu bixiyey kharash labaad ee ugu badan waxaana ku baxday $101M oo **39%** wadarta kharashaadka joogtada ah, Ha'aydada Bulshada ayaa lagu bixiyey **$19M oo 7%** ka ah wadarta kharashaadka joogtada ah, halka Hay'adaha dhaqaalaha lagu bixiyey **$16M** oo **6%** ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey bilaha Jan ilaa Juun 2025.

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Kharashaadka Mashaariicda ayaa lagu bixiyey **$120M** oo u dhiganta **16%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka mashaariicda, waxayna ka tahay **32%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa Juun 2025.

Mashaariicda hoos yimaado hay'adaha maamulka ayaa laga bixiyey **$40M** oo u dhiganta **25%** miisaaniyadda mashaariicda ee hay'adaha Maamulka. Mashaariicda hoos yimaada dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey **$38M** oo u dhiganta **13%** miisaaniyada mashaariicda ee hay'adaha dhaqaalaha. Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey $41M oo u dhiganta 15% miisaaniyadda mashaariicda ee haya'daha bulsha.

DHAMAAD

Lifaaqa 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah, Jan-Juun 2025

Code	Decriptions	Iskudarka Kharshaadka Jan-Juun 2025	Kutalagalka Dambe	Kutalagalka Hore	% Fulinta Kutalagalka Dambe
010100	**Xafiiska Madaxtooyada**	**5,247,715**	**12,417,171**	**12,529,086**	**42%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**2,832,212**	**6,550,197**	**6,662,112**	**43%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	486,029	956,763	1,012,068	51%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	2,322,333	5,536,194	5,592,804	42%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	23,850	57,240	57,240	42%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**2,415,503**	**5,834,203**	**5,834,203**	**41%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	598,373	1,425,000	1,425,000	42%
2221	Hawlaha Guud	134,785	323,492	323,492	42%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	307,470	737,959	737,959	42%
2224	Agabka iyo Alaabaha	7,790	18,700	18,700	42%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	36,000	36,000	0%
2231	Kirooyin	20,000	60,000	60,000	33%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	938,000	2,251,200	2,251,200	42%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	409,085	981,852	981,852	42%
26	**Deeqaha**	**-**	**32,771**	**32,771**	**0%**
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	-	32,771	32,771	0%
010201	**Xafiiska Golaha Shacabka**	**13,247,612**	**27,994,021**	**27,893,681**	**47%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**11,008,260**	**22,419,330**	**22,363,440**	**49%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	1,056,770	2,151,420	2,095,620	49%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	9,951,490	20,267,910	20,267,820	49%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**1,816,673**	**4,538,926**	**4,494,476**	**40%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	236,320	764,450	720,000	31%
2221	Hawlaha Guud	110,405	295,250	295,250	37%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	204,800	491,520	491,520	42%
2224	Agabka iyo Alaabaha	97,998	235,200	235,200	42%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	104,800	251,526	251,526	42%
2231	Kirooyin	121,800	243,600	243,600	50%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	940,550	2,257,380	2,257,380	42%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	**422,679**	**1,035,765**	**1,035,765**	**41%**
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	422,679	1,035,765	1,035,765	41%
010202	**Xafiiska Aqalka Sare**	**3,235,688**	**8,018,246**	**7,973,196**	**40%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**2,277,050**	**4,723,296**	**4,723,296**	**48%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	66,225	161,280	161,280	41%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	2,210,825	4,562,016	4,562,016	48%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**909,400**	**2,290,950**	**2,245,900**	**40%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	65,600	211,850	196,800	31%

2221	Hawlaha Guud	52,750	147,600	147,600	36%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	111,250	267,000	267,000	42%
2224	Agabka iyo Alaabaha	138,000	289,200	259,200	48%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	36,000	36,000	0%
2231	Kirooyin	64,800	194,400	194,400	33%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	477,000	1,144,900	1,144,900	42%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	**49,238**	**1,004,000**	**1,004,000**	**5%**
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	49,238	900,000	900,000	5%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	104,000	104,000	0%
010300	**Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**	**5,316,894**	**11,685,791**	**10,610,236**	**45%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**1,643,968**	**3,687,867**	**3,689,352**	**45%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	469,127	947,754	928,584	49%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	1,166,341	2,719,713	2,740,368	43%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	8,500	20,400	20,400	42%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**3,627,340**	**7,497,924**	**6,420,884**	**48%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	401,400	1,020,000	1,020,000	39%
2221	Hawlaha Guud	166,310	399,400	399,400	42%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	258,224	619,748	619,748	42%
2224	Agabka iyo Alaabaha	83,431	200,244	200,244	42%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	40,000	40,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	2,151,150	3,897,240	2,848,200	55%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	566,825	1,321,292	1,293,292	43%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	**45,586**	**500,000**	**500,000**	**9%**
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	45,586	500,000	500,000	9%
010400	**Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga**	**1,680,056**	**4,218,068**	**4,028,603**	**40%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**1,237,140**	**2,721,495**	**2,551,020**	**45%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	855,220	1,792,440	1,696,680	48%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	381,920	929,055	854,340	41%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**442,916**	**1,496,573**	**1,477,583**	**30%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	159,341	480,000	480,000	33%
2221	Hawlaha Guud	54,981	132,083	132,083	42%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	96,000	96,000	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	16,243	97,500	97,500	17%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	1,332	16,160	16,160	8%
2231	Kirooyin	-	81,000	81,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	203,190	499,830	480,840	41%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	7,830	94,000	94,000	8%
010401	**Safaaradaha**	**2,279,277**	**5,388,269**	**5,381,729**	**42%**

21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**1,820,365**	**4,518,660**	**4,518,300**	**40%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	667,485	1,703,835	1,714,860	39%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	1,152,880	2,814,825	2,803,440	41%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**458,912**	**869,609**	**863,429**	**53%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	31,500	264,000	0%
2221	Hawlaha Guud	-	66,925	166,925	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	39,327	159,327	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	15,000	64,327	89,327	23%
2231	Kirooyin	-	44,475	86,925	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	443,912	623,055	96,925	71%
010500	**Wasaaradda Maaliyadda**	**8,467,484**	**17,205,876**	**16,661,302**	**49%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**5,705,722**	**11,381,577**	**11,332,932**	**50%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	2,045,613	4,122,258	4,043,580	50%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	3,557,759	7,012,959	6,994,992	51%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	102,350	246,360	294,360	42%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**2,656,227**	**5,324,299**	**4,828,370**	**50%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	345,696	480,000	480,000	72%
2221	Hawlaha Guud	310,281	821,320	821,320	38%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	60,666	60,667	-	100%
2224	Agabka iyo Alaabaha	89,910	216,000	216,000	42%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	390,384	940,507	940,507	42%
2231	Kirooyin	107,707	365,599	365,599	29%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	212,700	384,000	384,000	55%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	506,772	735,262	300,000	69%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	632,111	1,320,944	1,320,944	48%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	**105,535**	**500,000**	**500,000**	**21%**
010501	**Xafiiska Xisaabiyaha Guud**	**1,628,060**	**3,430,309**	**3,413,164**	**47%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**1,390,036**	**2,771,505**	**2,754,360**	**50%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	389,895	822,492	789,060	47%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	783,931	1,516,593	1,532,880	52%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	216,210	432,420	432,420	50%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**238,024**	**658,804**	**658,804**	**36%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	4,758	36,874	36,874	13%
2221	Hawlaha Guud	68,769	174,950	174,950	39%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	8,518	36,050	36,050	24%
2224	Agabka iyo Alaabaha	105,038	275,930	275,930	38%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	15,000	15,000	0%
2231	Kirooyin	22,722	48,000	48,000	47%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	28,219	72,000	72,000	39%
010502	**Adeega Guud ee Dawladda**	**30,307,587**	**120,516,245**	**125,322,973**	**25%**
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**4,878,687**	**15,173,073**	**18,944,021**	**32%**

2243	Adeegyadda Bangiga	4,878,687	13,678,207	13,678,207	36%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	-	7,864	265,814	0%
2291	Kharashka kutalagalka Lama Filaan	-	1,487,002	5,000,000	0%
24	**Dulsaarka**	**2,915,443**	**13,800,000**	**13,800,000**	**21%**
2411	Dulsaarka la Siinayo Dadka aan Deganayn Dalka	2,915,443	13,800,000	13,800,000	21%
26	**Deeqaha**	**21,973,385**	**89,072,715**	**90,108,495**	**25%**
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	4,171,581	8,594,000	8,594,000	49%
2631	Deeqaha Joogtada ah ee La Siiyo Qaybaha Kale ee Dawladda	17,801,804	80,478,715	81,514,495	22%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	**540,072**	**2,470,457**	**2,470,457**	**22%**
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	300,000	300,000	0%
3112	Qalabka iyo Mashiinadda	60,283	370,457	370,457	16%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	479,789	1,400,000	1,400,000	34%
3114	Nidaamyada Hubka	-	200,000	200,000	0%
3144	Hantida aan Qiimo Dhicin ee an la Taaban Karin	-	200,000	200,000	0%
010503	**Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed ee Soomaaliya**	**349,800**	**997,837**	**1,004,452**	**35%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**307,450**	**741,837**	**748,452**	**41%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	99,150	236,637	243,252	42%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	208,300	505,200	505,200	41%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**42,350**	**256,000**	**256,000**	**17%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	4,858	120,000	120,000	4%
2221	Hawlaha Guud	24,496	60,000	60,000	41%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	5,000	15,000	15,000	33%
2224	Agabka iyo Alaabaha	7,996	24,000	24,000	33%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	1,000	1,000	0%
2231	Kirooyin	-	36,000	36,000	0%
010600	**Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha**	**1,093,311**	**2,796,158**	**2,757,998**	**39%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**885,780**	**1,977,231**	**1,939,836**	**45%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	464,265	979,701	939,336	47%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	362,965	857,010	859,980	42%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	58,550	140,520	140,520	42%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**207,531**	**818,927**	**818,162**	**25%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	121,500	121,500	0%
2221	Hawlaha Guud	37,992	114,000	114,000	33%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	6,000	24,000	24,000	25%
2224	Agabka iyo Alaabaha	6,000	24,000	24,000	25%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	2,666	2,666	0%
2231	Kirooyin	-	96,000	96,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	123,540	300,765	300,000	41%

